SOMALI

FADHIGA MAXMADDA KA DIB

Inta badan fadhiyada maxkamadduhu waa kuwo culus oo qofka daalinaya oo tabarta ka qaadaya. Waxaa wanaagsan in qofku naftiisa wakhti siiyo si uu uga soo laabto dhacdooyinkii maalintaas soo maray iyo si uu wixii uu la kulmay ugala hadlo oo ugala sheekaysto dad kale. Haddii aad u baahato qof warka kaa dhagaysta, waxaad tusaale ahaan wici kartaa taleefanka Auttava Rikosuhripäivystys oo ah xarunta dadka denbiyada laga galo ee la dulmo caawiso lambarkooduna wa 116 006.

Dhamaan adeegyada ay bixiso Rikosuhripäivystys waxaad ka helaysaa ciwaanka internetka ee **riku.fi/palvelut**

RIKU WAXAY U ADEEGTAA DADKA DENBIYADA LAGA GALO EE LA DULMO, DADKA EHELKA KUWAAS U AH IYO DADKA KIISASKA DENBIYADA AH MARKHAANTIGA KA NOQDA WAA LACAG LA'AAN ADEEGU DALKA OO DHAN.

/rikosuhripaivystys @rikosuhrit

Hawlo taageero ah:

MINISTRY OF JUSTICE
FINLAND

Visitor-toiminta oo ah mashruuc cadaaladda oo lagu maalgeliyey dhaqaalaha gudaha amniga Midowga Yurub.

SISÄISEN TURVALLISUUDEN RAHASTO
– POLIISIYHTEISTYÖ, RIKOLLISUUDEN EHKÄISEMINEN JA TORJUMINEN SEKÄ KRIISINHALLINTA
Euroopan unionin tuella

FADHIGA MAXKAMADDA KA HOR

Sida caadiga ah dhismayaasha maxkamaddaha marka la yimaado waxaa la maraa baaritaan qofka jirkiisa iyo wuxuu sito la baaro. Dhismayaasha maxkamadduhu waxay lee yihiin bar informayshkan laga qaato, bartaas oo laga helo kiisaska maalintaas maxkamaddu qaadayso iyo jadwalka fadhiyada maxkamadda iyo lambarada hoolasha maxkamadda lagu qaadayo. Hool kasta waxa ka socda gaarkiisa waxay ku dhagan tahay oo aad ka helaysaa warqad albaabka dhinaciisa ku dhagan.

Fadhiga maxkamaddu wuxuu u socdaa qaab u gaar ah oo jadwalkooda ah, ku talo-gal inaad sugto. Wakhtiga lagu siiyey waa iska qiyaas. Haddii aan lagu fasaxin oo laguu ogolaan inaad maxkamadda ka baxdo, waa in aad fadhido qololka fadhiga oo sugto wakhtiga laguu yeero.

Haddii aad tahay qof isaga denbi laga galay ama markhaanti oo ay dhib kugu tahay in aad meel kula sugto ama la fadhido qofka aad is haysaan, weydii xafiiska inay meel kale ku fariisiyaan.

Maxkamadda marka fadhigeedu furmayo oo dadka loo yeerayo waxaa badanaa la naadiyaa qofka eedaysanaha ah magaciisa, ka dib markaas ayaa dhamaan dadka oo dhami geli karaan qolka hoolka ah ee fadhiga maxkamaddu ka dhacayo. Fadhiga maxkamadda lagama bixi karo maxkamaddii oo socota, haddii aad u baahato xaakimka maxkamadda ayaad ogolaansho weydiisan kartaa in bareeg lagu siiyo. Ka taxadar in taleefankaaga codku ka xiran yahay ka hor inta aadan hoolka soo galin.

Dadka denbiga laga galay oo kiisku khuseeyo iyo markhaantiyaalku waxay heli karaan mag-dhaw ama lacag maalmeed maalinta ay fadhiga maxkamadda yimaadeen ah, waxay kaloo heli karaan kharashkii kaga baxay gadiidka ay ku yimaadeen oo ah kan ugu jaban ee lagu imaan karo iyo sidoo kale haddii ay jirto lacag ay maalintaas shaqaysan lahaayeen oo ka baaqatay. Xafiiska xoghaynta ee maxkamadda ayaad weydiin kartaa mag-dhawga sida loo codsado iyo sida loo bixiyo. Mag-dhawga ay dawladdu ku bixiso imaanshaha maxkamaada iyo qofka denbiilaha ah mag-dhawyada lagu soo oogo waa labo arimood oo kala labo ah.

Waxaad mar kasta talo weydiin kartaa shaqaalaha maxkamadda.

RIKU
RIKOSUHRIPÄIVYSTYS

MARKAA MAXKAMADDA DHEXDEEDA TAHAY QOFKII DEBIGA LAGA GALAY AMA MARKHAANTI

– SIDA NADAAMKA CAADIGA AH YAHAY

TALO-BIXINAHA XAFIISKA CAAWIYA DADKA DENBIGA LAGA GALO EE DULMANAYAASHA AH ● 3 (2017)

RIKU
RIKOSUHRIPÄIVYSTYS

DADKA FADHIYA FADHIGA MAXKAMADDA

- Waaa gudoomiyaha fadhiga maxkamadda oo ah sharci-yaqaan xaakim ah
- Karaani
- Gudi gar-qaybta ah ama waa odayaal dhaqameed xaakimo ah oo ka qayb qaata fadhiyada maxkamaddaha qaarkood. Marmarka qaarkood booska odayaashan waxaa gala dhawr xaakim ama qaali oo caadi ah.
- Xeer ilaaliyaha
- Qofka denbiga laga galay ama dulmanaha denbigu ku dhacay
- Eeddaysanaha waa qofka denbiga inuu galay lagu soo eedeeyey
- Caawiye fadhiga maxkamadda jooga waa qareen ama looyara ama qof sharci yaqaan ah
- Markhaanti

Waxaa intaasi dheer oo fadhiga maxkamadda fadhin kara qof caawiye ah, turjubaan iyo qof dane ilaaliye qof kale u ah. Qofka dhibanaha ah iyo markhaantiga waxaa suurtogal u ah in loo qabto qof caawiya oo garab u ah mudada boroseeska maxkamaddu uu socdo, waxaana tusaale ahaan qofka caawiyaha ah laga qabsadaa xafiiska Rikosuhripäivystys ama xafiiska caawiya dadka la dulmo oo deniga laga galo. Qofka dane ilaaliyaha ah waxaa isaga loo baahdaa marka dhibanaha ama kan denbiga lagu soo eedeeyey yahay qof aan qaan-gaar ahayn, oo dadka dhalay ama ka masuulka ah markaas u ilaalin karin danihiisa oo masuul u noqon karin. Sidoo kale dadka waaweyn xataa waa loo qabtaa qof danahooda u ilaaliya.

Fadhiyada maxkamadduhu badanaa waa boblig dad weynaha u furan, sidaas aawadeed waxaa imaan kara oo dhagaysan kara shacab. In kiiska lagu qaado fadhi maxkamaddeed oo albaabadu u xiran yihiin si gaar ah waa in loo codsado. Maxakamadda ayaa leh go'aanka ah fadhiga maxkamaddu sida uu noqonayo in albaabada loo xirayo iyo inuu boblig noqonayo.

Marmarka qaarkood waxaa dhacda in dhibanaha ama markhaantigu uusan doonayn inuu wajaho oo arko kan denbiga lagu soo eedeeyey. Maxkamadda darajada kowaad ayaa waxay markaas samaynaysaa in hoolka dhexdiisa lagu kala xiro alwaax aan la is arkayn ama waxay samaynaysaa in kan denbiga lagu soo oogay uusan fadhiyin meesha lagu waraysanayo kan denbiga laga galay ama markhaantiga.

XEER-ILAALIYAHA, QOFKA DENBIGA LAGA GALAY IYO KAN DENBIGA LAGU OOGAYO WAXAA LOO ISTICMAALAA HAL MAGAC OO AH KUWII KIISKU KHUSEEYEY.

GUDO-GELITAANKA KIISKA EE DHABTA AH

Gudoomiyaha fadhiga maxkamadda ayaa biloowga hore hubinaya in dhamaan dadka maxkamadda ka qayb qaadanayaa goob-joog yihiin. Haddii dhamaan dadkii fadhiga maxkamadda looga yeeray aysan goobta joogin, waxaa dhici karta in kiisaska qaarkood kiiskii la gudo-galo. Hase ahaatee badanaa fadhiga maxkamadda dib ayaa loo dhigaa oo maalin kale ayaa laga dhigaa, maalintaas oo la rabo in dhamaan dadka maxkamadda looga yeeray wada yimaadaan. Marka maxkamadda dib loo dhigo dadkii markaas yimid ee uu xeer ilaaliyuhu u yeeray dhibanayaasha iyo markhaantiyaalku waxay xaq u lee yihiin in looga mag-dhabo kharashkii ka soo baxay.

Dadka loo yeeray marka la hubiyo inay goob joog yihiin ka dib ayaa markhaantiyada hoolka dibadda looga saaraa si ay u sugaan wakhtiga loo yeerayo ee ay markhaatiga furayaan, taas oo marka wakhtiga la gaaro magaroofanka looga yeero.

SIDA LOO SHEEGTO WAXAAD SOO OOGAYSO IYO SIDA LOOGA JAWAAB BIXIYO WAXA LAGUGU SOO OOGAY

Bilawga hore ee fadhiga maxkamadda xeer ilaaliyaha iyo dhibanaha ayaa sheega waxa ay soo oogayaan oo eedayntoodu tahay iyo sababaheeda. Kan denbiga lagu soo eedeeyey ayaa jawaab ka bixiya waxa lagu soo oogay oo sheega in eedayntu ay sax tahay iyo in kale.

Kiisaska qaarkood waxaa dhici karta in kan eedaysanaha ah la codsado in baaritaan xagga maskaxda ah lagu sameeyo, taas oo go'aankeeda fadhiga maxkamadda lagu gaaro. Maxkamaddana waa la joojiyaa mudada uu baaritaanku socdo. Kiiska waxaa dib loo galaa dhawr bilood ka dib. Baaritaanka ujeedada laga lee yahay waxay tahay in la ogaado qofkan denbiga galay ma fahamsanaa denbigan uu falay waxa ka dhalan kara, taas oo macnaheedu yahay wakhtiga uu denbiga falayey ma si buuxda buu u caqli qabay mise wax baa ka dhinaa. Qof aan dhamayn oo fal sameeyey lama xukumi karo.

SOO BANDHIGIDDA KIISKA

Dadka kiiska ku lug leh ee ay arintu khusayso ayaa qof waliba wuxuu sheegaa aragtidiisa sida ay la tahay ee uu u arko arinta iyo sida wax u dhahceen. Waxay kaloo sheegaan caddaymaha qoraalka ah ee ay warkooda ku salaynayaan iyo sida ay ku muujinayaan in ay caddaymahaasi yihiin run, iyo dadka ay doonayaan in markhaanti ahaan loo dhagaysto.

Kiisaska sida loo soo bandhigo iyo sida arimaha la isugu xejiyo waa isku wada mid waxayna u kala horeeyaan: xeer ilaaliyaha, dhibanaha, ka dib eedaysanaha.

MARAGGA

Maragga iyo caddaymaha ayaa la gudo-galaa waxaana loo kala saaraa caddaymo marag ah oo qoraal ah iyo markhaantiyaal la dhagaysto. Dhibanaha iyo eedaysanuhu waxay xaq u lee yihiin inay su'aalo is weydaarsadaan dhexdooda iyo inay markhaantiyaasha su'aalo weydiiyaan. Haddii dadka kiisku dhex yaal ay wataan looyaro, badanaa qareemadooda ayaa u hadla oo su'aalaha u weydiiya. Badanaa waxa lagu wada hadlayo waa la duubaa.

Markhaantiga iyo dhibanaha waxaa saaran waajibaad ah inay runta sheegaan. Taas macnaheedu wuxuu yahay inay wax kasta runta ka sheegaan wax kasta oo ay og yihiin ama ka xasuustaan dhacdada. Kan la soo eedeeyey waajibaadkaasi isaga ma saarna, sababta oo ah qofna looma baahna inuu naftiisa ku markhaanti furo oo naftiisa ku jeesto.

HADALKA KHATIMKA AH AMA GABAGABADA AH

Dadka kiisku u dhexeeyo waxay samayn karaan oo ka soo jeedin karaan wixii la soo bandhigay iyo caddaymaha hadalkoodi khatimka ahaa, waxay kaloo soo jeedin karaan waxa ay la tahay oo ay xalka ama xukunka u arkaan. Inta badan qareenka ama looyarka aad qabsato ayaa sameeya hadalka gaba-gabada ah oo kuu hadla.

XUKUN

Fadhiga maxkamaddu markuu dhamaado hoolka waa la faaruqiyaa oo waa laga wada baxaa, waxaa ku hara xubnaha maxkamadda qaadaya oo ka gaara go'aan in qofku denbiga galay iyo wixii ciqaab ka ratibmi kara.

Xukunka la gaaray waxaa lagu dhawaaqi karaa isla marka maxkamaddu dhamaato ama gadaal ayaa dadka laga siiyaa, xukunka oo ah sida lagu magacaabo xukun xoghaynta laga bixiyey, kaas oo wakhtiga la bixinayo laga dhex sheego inta aan fadhiga maxkamaddu dhamaan. Markaas oo xukunka laga qaadan karo isla xafiiska xog-haynta ama waxaa loo dirayaa xukunka looyarkaaga. Xaaladdaha qaarkood waxaa suurtogal ah haddii aad codsato in guriga laguugu soo diro oo boosta laguu soo dhigo ama e-mayl ahaan laguugu soo diro xukunka.

Marka xukunku dhaco ayaa maxkamaddu waxay soo sheegtaa talooyin ku saabsan sida xukunka rafcaan looga qaadan karo, ama sida ay yeelayaan haddii dadka is haya ee xukunku ku dhacay doonayaan inay xukunka rafcaan ka qaataan oo maxkamadda rafcaanka la xiriiraan.

Haddii aadan ku qanacsanayn xukunka, waa in aad maxkamadda ku soo ogeysiiso mudo 7 casho ah gudaheed, mudadaas oo ka bilaabmaysa maalinta xukunku dhacay oo ah maalintaas maalinta ku todoba ah ka hor inta aan wakhtiga shaqadu dhamaan. Waxaad markaas haysataa mudo 30 casho ah oo aad rafcaankaaga ku soo gudbisato.

Maxkamadda rafcaanka go'aankeeda inaad iyada rafcaan uga qaadato maxkamadda sare waxaad u baahan tahay inaad marka hore maxkamadda sare ogolaansho ka hesho.